



DANISH REFUGEE COUNCIL
Borgergade 10, 3rd
DK-1300 Copenhagen K

Tel +45 3373 5000
Fax +45 3391 4507
www.flygtning.dk
return.advice@drc.dk



DANISH RED CROSS
Rosenørns Allé 31
1970 Frederiksberg C

Tel +45 29 10 39 33
www.rodekors.dk
E-mail: return@redcross.dk



DIIDMO – MAXAAN SAMEEYAA?



Diidmo – maxaan sameeyaa?

Dhammaan magangalyo-doonka diidmo ka helay dalka Denmark waxay heystaan fursad ay wada-tashi faahfaahsan kula yeelan karaan urur samafal oo madaxbannaan.

Galkaan (folder) waxaa lagu siiyey ka dib markii aad heshay diidmo ku saabsan codsigaaga magangalyo-doonka ah. Go'aankan diidmada waa mid kama dambeys ah, taasoo micnaheedu yahay in aanu jirin maamul-dawladeed kale ama maxkamad dalkan Denmark aad uga dacwoon karto go'aankan. Sidaas daraadeed kiiskaaga magangalyo-doonka ah ee Denmark wuu dhammaaday oo waa la xiray, maamulka Deenishkana waxay go'aansadeen inaad dalka ka baxdo.

Diidmadan ku saabsan kiiskaaga magangalyo-doonka ah, ayaa waxaa laga yaabaa inay kugu dhalisay shaki ama wel-wel ku saabsan, waxa kugu dhici kara, haddii aad dalkaaga dib ugu noqoto. Waxaa laga yaabaa inaad hadda hayso su'aalo ku saabsan ka bixidda dalkan, ama sharciyada iyo xeerarka khuseeya dadka magangalyada loo diiday. Waxaa kaloo laga yaabaa inaad u baahan tahay wadahal aad ku falanqeyso qorshahaaga dib ugu noqoshada dalkaaga hooyo, amaba aad kula hadasho mid ka mid ah shaqaaleheena jooga dalkaaga.

Waxaad heli kartaa wada-tashi shakhsiyadeed si aad u hesho sharraxaad dheeraad ah oo ku saabsan diidmada codsigaaga magangalyo, talooyin dhinaca sharciyada ah, ugu falanqeyso waxaad ka fakarayso isla markaana u weydiiso su'aalaha muhiimka ah ee ku saabsan ku noqoshada dalkaaga hooyo. Turjumaan ayaa kullankan joogi doona.

Haddii aad rabto wada-tashigan waa inaad buuxisaa warqadda foomka ah ee bogga xiga. Saxiixaaga warqadda foomka ah wuxuu calaamad u yahay oo keliya inaad rabto kullanka wada-tashiga, ee ma ahan inaad saxiixday in aad si ikhtiyaari ah dib ugu noqoneyso dalkaaga.

Warqadda foomka ah waxaad u geyn kartaa shaqaalaha xaruntaada magangalyo, ama si toos ah ayaad noogu soo diri kartaa. Macluumaadka ku saabsan la xiriirkeena ka eeg bogga dambe.

Codsi wada-tashi: magangalyo-doonka diidmo la siiyey

Magaca:

Lambarka aqoonsiga (ID-nummer):

Lambarka aqoonsiga caruurta:

Luqadda:

Cinwaanka:

Ka dib markii aan helay diidmo ku saabsan codsigeyga magangalyo ee Denmark, ayaa waxaan rabaa inaan wada-tashi shakhsiyadeed la yeesho urur samafal oo madaxbannaan ee Denmark.

Waxaan sidaas darteed halkan ugu ogolaanayaa maamulka dowladda inay Hay'adda Qaxootiga Caawisa (Dansk Flygtningehjælp) iyo Ururka Laanqayrta Cas (Dansk Røde Kors) ee Denmark siin karaan waraaqaha kiiskeyga codsiga magangalyo- doonka iyo kuwa caruurteyda, iyo sidoo kale haddii ay jiraan waraaqo codsi deganaasho bani'aadaminimo ah.

Waxaa kaloon ogolaanayaa in ay Hay'adda Qaxootiga Caawisa iyo Ururka Laanqayrta Cas ee Denmark isu gudbin karaan macluumaadka ku saabsan kiiskeyga magangalyo-doonka ah.

Ma aanan ogolaanin inay ururadan kor ku xusan macluumaadkan la qeybsan karaan maamulo iyo mas'uuliyiin dawlado kale ah.

Taariikhda

Saxiixa

